

SHAQADA OO LAGAA FASAXO SI AAD U CODAYSO



Waxaad xaq u leedahay in shaqada lagaa fasaxo si aad u codayso, adiga oo aan lagaa goynayn lacag, fasaxa gaarka ah, ama fasax aad xaq u yeelatay.

Looshaqeeyahaaga waxaa waajib ku ah in uu bixiyo waqtiga aad u baahan tahay in aad ku codayso, haddii waqtigaasu ku soo aado jadwalkaaga shaqada. Looshaqeeyahaagu shuruud kaagama dhigi karo in aad isticmaasho fasaxa gaarka ah, ama fasax aad xaq u yeelatay.

Isticmaal oo kaliya waqtiga aad u baahan tahay in aad ku codayso oo shaqadaada aad.

Looshaqeeyahaagu si toos ah ama si dadbanba kuuguma diidi karo, xadidi karo, ama faragelin kuma samayn karo xaqqaan, oo ay ka jirto in aad codaysid waqtiga aad doorato.

Looshaqeeyahaagu waa ku waydiin karaa in aad u sheegto marka aad tegaysid, iyo in uu waydiisto in shaqaaluhu isuduwaan waqtigooda si maqnaanshahoodu aanu u carqaladayn shaqada.

Waxaad xaq u leedahay in shaqada lagaa fasaxo si aad u codayso dhammaan doorashooyinka federaalka iyo gobolka, iyo dhammaan doorashooyinka deegaanka ee leh jadwal joogto ah.

TAARIIKHAHA 2026

DOORASHADA AASAASIGA

Talaada, 11ka Bisha 8aad
(August)

MAQNAANSO KU CODAY

Coday adigoo boostada ku soo diraya ama qof ahaan imanaya 18ka Bisha 9aad (September) ilaa 2da Bisha 11aad (November).

ISDIIWAANGELI SI AAD U CODAYSO

Hory isudiiwaangeli ugu dambayn 13ka Bisha 10aad (October) si aad waqti u hesho Maalinta Doorashada.

MAALINTA DOORASHADA

Talaada, 3da Bisha 11aad
(November)

waa socotaa eeg bogga gadaale...

Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota
mnvotes.gov • 1-877-600-VOTE

SHAQADA OO LAGAA FASAXO SI AAD U CODAYSO



...ka timid horay

CABASHOORYINKA

Looshaqeeyaha sharcigan ku xadgudba waxaa lagu helayaa dembi fudud. Wixii cabashooyin ah ee ka imanaya shaqaalaha waa in loo gudbiyaa xeerilaaliyaha degmada.

HORE U CODEE ADIGA OO ADEEGSANAYA WARQADDA CODBIXINTA MAQANAHA

Waxa aad xili hore codayn kartaa haddii aadan doonayn ama aadan codayn karin maalinta doorashada. Xuquuqda aad u leedahay in aad wakhtiga shaqada ka qaadata si aad u soo codayso ayaa la balaarinayey iyadoo lagu darayo wakhti kasta inta lagu jiro muddada codbixinta maqnaanshaha, taasoo bilaabmaysa 46 maalmood kahor doorashada.

Goor hore ayaad ka codayn kartaa doorashadaada deegaanka adiga oo adeegsanaya warqadda codbixinta maqnaanshaha. Waxaad sidoo kale ka codsan kartaa in boostada laguugu soo diro warqadda codbixinta maqnaanshaha mnvotes.gov/absentee.

WARQAD LOOGU TALAGALAY LOOSHAQEEYAHAGA

Booqo mnvotes.gov si aad u hesho warqad aad siin karto looshaqeeyahaaga una faahfaahinaysa xaqqa aad u leedahay in shaqada lagaa fasaxo si aad u codayso.



Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota
mnvotes.gov/somali • 1-877-600-VOTE